## Daraasadda Xuduuda MPS S&J

### 1) Waa ayo Cidda qorshahan si wada jir ah u isu keenay?

MPS waxay siisaa xogta ardaydeena hadda Edulog, Shirkadda qarsoodiga ah ee bixisa software-ka nidaamka basaska ee wadatashiga xuduudaha ee dugsiyada adduunka oo dhan. Daraasaddu:

- Waxay aqoonsataa qaabka dugsiga bulshada halka ardayda intooda badan ay ku xidhgtaan xaafadooda dugsiga hoose iyo kan dhexe ilaa fasalka 8aad
- Waxay daraasadaysaa saamaynta xuduudaha dugsiga iyo meelaha gaadiidku yimaad ee heerka dugsiyada bulshada ee isdhexgalka iyo isqorista goob ahaan.
- Waxay daraasaysaa isqorista marka loo barbardhigo awooda suuqa saamiyada hada lagu caawiyo in lagu garto meelaynta iskuulada magnetka, ee awooda ku saleysan tirada fasalada iyo xajmiga fasalada..
- Xisaabinta saadaalinta isqorista, kala-sooca isirka iyo uruurinta saboolnimada oo la kordhinayo saamiga suuqa iyo tirakoobka mustaqbalka

### 2) Kororka dhex-dhexaadka ah ee dhexgalka miyay saameyn badan ku yeelan doontaa guusha waxbarasho? Mudo intee leeg ayay qaadan doontaa in tan la ogaado?

Daraasaduhu waxay muujinayaan xiriir muhiim ah oo ka dhexeeya guusha waxbarasho sida lagu qeexay heerarka aqoonta iyo sinjiga iyo dakhliga labadaba. Magaalada Minneapolis waxaa ka jira xiriir 96% oo ka dhexeeya Qiyaasta dugsiga iyo heerka aqoonta. Isla mar ahaantaana, xiriir adag ayaa ka dhexeeya qoysaska midabka leh iyo ardayda qaata qado bilaash ah iyo qiimo jaban. Bedelaada heerarka isdhaxgalka isirka iyo dhaqaalaha ee iskuulada waxay u badan tahay inay saameyn ku yeeshaan guulaha. Heerka saameynta ayaa ku xirnaan doonta heerka isbedelka isdhaxgalka.

Qaabka dugsiyada bulshada, dugsiyada qaar waxay noqon doonaan kuwa kala jaad jaad ah (midab iyo / ama dhaqaale ahaan) ilaa 50% - waxayna arki karaan koror isbarbar dhiga ah oo ka yimid dhibcaha boqolkiiba MCA. Dhanka kale, iskuulada ay dadwaynuhu arkeyaan heerar sare oo ardayda dakhligoodu hooseeyo waxay arki karaan hoos u dhac ku yimid buundooyinkooda MCA. Guud ahaan, cilmi baaristu waxay muujineysaa in jawiga barashada isku dhafan ay taageerto hagaajinta horumarka waxbarashada, awoodaha bulshada iyo shucuurta, iyo xirfadaha fakarka ee ardayga.

**3) Goorma ayaa la samaynayaa isbedello kasta oo xuduudaha ah?**

Wax talo bixin ah lama sameynin ficilna lama go’aamin. Kani waa daraasad ku saabsan xuduudaha MPS haddii ardayda oo dhami ay dhigtaan iskuulada xaafadooda. Guddiga waxbarashadu waxay ka codsadeen daraasaddan inay arkaan haddii iskuulada bulshada ay bixin doonaan khibrad waxbarasho oo isku dhafan, iyo sida xuduudaha gaadiidku ay u saameeyaan meelaynta ardayda ee dugsiyada.

**4) Dugsiyada ma la xiri doonaan hadaan go’aansanno inaan fulino isbedeladaan xuduudeedka ah? Goorma? Waa kuwee kuwa lagula talinayo xiritaanka?**

Wax talo bixin ah lama sameynin ficilna lama go’aamin. Daraasadda xudduuddu waxay muujineysaa dhowr iskuul oo leh heerar isqoritaan oo u baahan kabitaan si ay u shaqeeyaan. Xitaa qaab dhismeedka hadda ah, MPS waxay leedahay iskuul hooseeya oo u baahan kabitaan. Kabitaan ayaa loo baahan yahay marka xaddiga lacageed ee la siiyo ardaygii kuma filna in lagu bixiyo dhammaan jagooyinka iyo barnaamijyada looga baahan yahay in lagu bixiyo waxbarasho habaysan oo dugsigaas ah.

Ma jiro qof raba inuu xidho iskuullada muhiimka u ah shaqaalahooda iyo qoysaskooda, welibana MPS waa inay eegaan hadafka ugu weyn ee lagu hagaajinayo khibrada waxbarasho ee 60% ardayda aan sifiican loogu adeegin

**5) Immisa lacag ah ayay daraasadani ku kacday?**

MPS waxay miisaaniyad u sameysay $ 250,000 daraasaddan. Wejiga koowaad wuxuu ku kacay $ 95,000. Marka wejiga labaad la dhammaystiro -

oo ah halka magnet la go'aamiyo oo la dhigo - isugeyn kharash ayaa la heli doonaa.

**6) Ma, u badbaadin doona lacagta MPS Qaabka iskuulka bulshada?**

Ujeeddada daraasadda xudduuddu waxay ahayd in la barto bal in qaab dugsiyeedka bulshada uu saameyn ku yeelan doono is-dhex-galka MPS dhexdeeda, taasna, waa in lagu guuleysto. Moodeelka iskuulka bulshada oo leh gaadiid yar wuxuu badbaadin karaa xoogaa lacag ah keydkanna waxaa saameyn ku yeelan kara arrimo kale, sida diiwaangalinta ardayda iskuulada magnetka, waqtiga gambaleelka(jalaska), aggaga soonayaasha laga soo lugeeynaayo iyo qodobo kale.

**7) Sidee qorshahani saameyn ugu yeelan lahaa dugsiyada sare?**

Dugsiyada sare kuma jiraan daraasaddan sababta oo ah gaadiid loo raaco dugsiyada sare waxaa badanaa la bixiyaa iyada oo loo maro Metro Transit iyo baska iskuulku maro. Dugsiyada sare way saameyn doontaa, hasayeeshee, iyadoo lagu kala saarayo isdiiwaangalinta dugsiyada ay wax ka cunaan, taas oo laga yaabo inayna saameyn ku yeelato ama aanay ku yeelan ilaha dhaqaalaha dugsiga. Haddii qaabka dugsiga bulshada uu si guul leh u kordho natiijada akadeemiga taas darteed, ardayda waxay sifiican ugu diyaar garoobayaan markay gaaraan dugsiga sare.

**8) Sidee qorshahan saameyn ugu yeelan doonaa qeybinta Title I dollars?**

Maaddaama tirada dadka iskuulku isbeddelaan, ayaa sidoo kale ilaha dakhligoodu heli karaa. Qaar ka mid ah kuwa hadda u qalma Title I dollars ayaa laga yaabaa inanay noqon, qaar baa sii jiraya, qaar ayaa laga yaabaa inay dib u cusbooneysiiyaan. MPS ayaa hadda u qaybiya iskuullada Title I dollars dugsiyada ay ku nool yihiin ardaydoodu 40% ama in ka badan oo arday ah oo qaata qado bilaash ah ama qiime jaban. Daraasaddan iskuulada bulshada, shan iskuul ayaan xaq u yeelan doonin maalgelinta Title I.

**9) Miyaa laga saarayaa K-8?**

Wax go'aan ah lama gaarin waqtigaan in lagu baabi'inayo dugsiyada K-8. Daraasadkaani waxay iskuulada u sameysay sida K-5 ama 6-8 si loo fahmo si

fiican  fursadaha iyo caqabadaha ka jira degmadeena ee laxiriira isdhaxgalka, gaadiidka iyo guusha waxbarashada.

Xusuusnow, kani waa daraasad ay codsadeen Gudiga Waxbarashada maahan muhiim in la dhaqan geliyo. Macluumaadkaan waxaa loo isticmaalaa in lagu fahmo fursadaha iyo caqabadaha ka jira degmadayaga. In kabadan 60% ardayda MPS sifiican looma adeegin waana degmadu waa inay eegtaa waxkasta si loo ogaado meesha iyo hadii isbadal lagu sameyn karo.

**10) Wejiga 2aad ee daraasadda sidee MPS u go'aamisay dugsiyada Magnetka halkee ama moodelkan lagu tirinayaa in lagu meelaynaayo?**

- **u fududeynta arday tiro badan** iyada oo lagu diiwaangalinayo dhismayaasha dugsiyadii horey ugu yaalay agagaarka xarumaha xaafadooda juquraafi ee degmada, si loo yareeyo socdaalka basaska dhaadheer ee magaalada oo dhan isaga gooshaaya.
- **Baaxada Awoodda xarunta iyo iskuulada bulshada ku xeeran** si loogu adeego tirada ardayda ee aagga xaafada.

**Wejiga 2aad ee daraasadda sidee MPS u go'aamisay dugsiyada Magnetka halkee ama moodelkan lagu tirinayaa in lagu meelaynaayo?**

- **u fududeynta arday tiro badan** iyada oo lagu diiwaangalinayo dhismayaasha dugsiyadii horey ugu yaalay agagaarka xarumaha xaafadooda juquraafi ee degmada, si loo yareeyo socdaalka basaska dhaadheer ee magaalada oo dhan isaga gooshaaya.
- **Baaxada Awoodda xarunta iyo iskuulada bulshada ku xeeran** si loogu adeego tirada ardayda ee aagga xaafada.
- **Hoos u dhigga tirada dugsiyada Magnetka** ayaa ah qaab kale oo lagu dhimayo adeyga iyo murugsanaanta gaadiidka iyo in kor loogu qaado ilaha maalgashiga .
- **diiwaangalinta ardayda noocyada dugsiyada magnetka ee ay daneeyayaashayadu noo sheegeen ayaa ah kuwa si aad ah loo door bidaayo ama loo doorto**: lehna barnaamijyada STEM / STEAM, Arts, barashada Isbaanishka / Luqadda iyo dhaqanka, iyo Montessori
- **Isku habeynta Fasalka ayaa ah K-5 iyo 6-8** - iskuulada K-8 ma jiraan. Sababta isbedelkaan ayaa ah in sababao kala duwan oo MPS aysan si joogto ah u bixin karin waxbarashada waaya aragnimo isku dhafan leh ee dugsiga dhexe ah ee ka dhexeysa qaab dhismeedka dugsiyada K-8.

-

11) **Sidee daraasadani u qeexeysaa iskuulada magnetka?**

Iskuulada Magnet waxay bixiyaan tilmaamo waxbarasho loo habeeyay oo loogu talagalay inay ardayda ka soo jeedaan qaybaha kale ee degmada ujeeddooyin ku saabsan is-dhexgalka ardayda iyo is-dhexgalka ardayda. Iskuulada Magnetka waxay heli karaan doolarka isdhaxgalka federaalka, waxay bixiyaan gaadiid si aad ah u balaaran oo kusalaysan aag dugsi xaadirid, iyo laga yaabaa inay horumar ku sameeyaan waddo loo maro dugsiga dhexe.

12) **Waa maxay farqiga u dhexeeya Iskuulada magnetka iyo iskuulada takhasuska leh?**

Labaduba waxay bixiyaan waxbarasho isku mid ah, laakiin himilooyinka tilmaamahaas way kala duwan yihiin. dugsiga Magnets-ka waxaa loogu talagalay in lagu kordhiyo is-dhexgalka ardayda iyada oo la ardayda ka soo codsan karaan qaybo ka mid ah magaalada. Iskuulada khaaska ah waxaa loo habeeyay inay kordhiyaan isqorista aaggaga xaafada iskuulada ku yaalo ayagoo usoo bandhigaaya mowduucyada ay qoysasku danaynayaan iyo ardayda deegaankaas. Sababtoo ah is-dhexgalka ardayda ma ahan hadafka koowaad, doollarka is-dhexgalka federaalka ayaan lagu heli karin in lagu maalgeliyo iskuulada khaaska ah. Gaadiidka ka imanaya meel ka baxsan goobta ka soo xaadirka iskuulka lagama heli doono. Iskuulada khaaska ah guud ahaan waxay ku xadidan yihiin dugsiyada hoose mana sii horumariyaan. Ujeeddooyinka daraasaddan, ayaa loo malaynayaa in dugsiga bulshada u baahan doono inuu codsado qaabeynta qaaska, kaas oo loo oggolaan doono ama loo diidi doono iyadoo lagu saleynayo qeexitaanno degmo oo joogtada ah.

13) **MPS wali ma, bixin doonaan iskuullada qaas ah?**

Waqtiyada loo qoondeeyay iyo hirgelinta iskuulada khaaska ah wali lama go'aamin, laakiin qodobada ku saabsan magacaabida iskuulada qaaska ah waxaa ka mid noqon kara

14) **Sidee tani u yarayn doontaa kaabayaasha degmada?**

Waxyaabo badan oo kaabayaashayada ah ayaa hadda dhaafaya baahida degmaadeena. Nidaamkayaga gaadiidku wuxuu si ka sii fiican isugu toosan karaa, oo u baahan basas yar iyo marinno, kaydadka gaagaaban iyo kuwa muddada-dheer.

- Iskuulka way dhameystiraan laakiin lama tartamaan iskuulada magnetka
- Waxay ka tarjumayaan qiyamka bulshada iyo rabitaankooda sidaas darteed waxaa laga yaabaa  iskuuladaan inay kordhiyaan isqorista.
- Si buuxda uma matalaan degmada.
- Waxay joogteeyaan  iyaga oo aan helin maalgelinta degmada oo dheeri ah miisaaniyadda dugsiga
- Iskuulku wuxuu leeyahay meelo/ baaxad awood u leh
- Gaadiidka oo loo ballaadhiyo looma baahna
- Nidaamka codsashada ogolaanaaya

**14)  Muxuu macluumaadkan ugu soo dari waaya boggaga Barnaamijyada Waxbarshada Gaarka ah ee Magaalo weynta**

Waaxda Waxbarshada Gaarka ah ee MPS iyo daneeyayaasha daneeya ayaa eegi doona halka barnaamijyada sida ugu badan loogu dhigi karo. In kasta oo dugsi kasta uusan lahaan karin nooc kasta oo barnaamijyada magaalada oo dhan ah oo diyaarka ah, haddana waxaan rabnaa inaan hubinno in fasallo si isle'eg loogu qaybiyo degmada. Sida meelaynta magnetka, qodobbada soosocda ayaa la qaddarin doonaa marka la samaynayo meelaynta Waxabarasha Gaarka ah ee Magaalada oo dhan:

- Helitaanka juquraafi ahaan
- Dhamaan intay ardaydu tiro le’eg tahay
- Qiimaha, helitaanka xarunta, awooda iyo u diyaarsanaanta
- Iskuulada Magnes-ka

Sanad kasta Waaxda Waxbarashada Gaarka ah waxay isbeddel ku samaysaa barnaamijka si loo hubiyo inaan awood u leenahay inaanu daboolno baahiyaha ku qeexan barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) ee ardayga. Tani waxay sii socon doontaa sanad dugsiyeedka 2020-21 iyo wixii ka dambeeya..

**15) Waa maxay sababta ay u leedahay hal Moodeel oo keliya?**

Saddex moodeel oo kale ayaa la soo bandhigay bishii Abriil ee sannadka 2019, oo markaa guddiga waxbarashadu faray inay Dudgiyada dadweynaha Minneapolis baartaan sida loo abuuro moodal kordhinaya is-dhexgalka. Iyada oo ku saleysan qiyamka uu soo saaray Guddiga, moodelkan hadda la sameeyay. Meeleynta Magnet waxaa loogu talagalay kaydinta gaadiid ugu badnaan. Isbedelada qaabkan ayaa ah gabi ahaanba suurtagal. Isbeddel kasta waa in lagu miisaamaa waxyeelada uu leeyahay iyo qiimaha saamaynta uu yeelan karo  waana in la miisaamaa oo mudnaan la siiyaa.

**16) Haddi MPS ay lacag ku keydiso qaab iskuul xaafadeed, sidee dib loogu heli karaa?**

Waxaa laga yaabaa in lacag la kaydiyo muddo gaaban, qodobka ugu muhiimsan ayaa ah in la joojiyo kharashaadka ka badan dakhliga aan soo saarno. Yaraynta kaabayaasha waxay qeyb weyn ka noqon doonaan isu dheellitirka dakhliga iyo kharashyada mustaqbalka MPS. Kaydinta muddada-gaaban ayaa dib loogu heli karaa barnaamijyada waxbarasho ee la xidhiidha Naqshadeynta Degmada ee Dhameystiran.

**17) Sidee tani u yarayn doontaa kaabayaasha degmada?**

Waxyaabo badan oo kaabayaashayada ah ayaa hadda dhaafaya baahida degmaadeena. Nidaamkayaga gaadiidku wuxuu si ka sii fiican isugu toosan karaa, oo u baahan basas yar iyo marinno, kaydadka gaagaaban iyo kuwa muddada-dheer.

Haddii iskuulada aan diiwaangashanayn la xirayo, shaqaalaha iyo waxqabadka gaadiidka ayaa la qabsan karaa oo sannadaha soo socda ayaa loo qaadi karaa. Dhismooyinka yar waxay sababi doonaan hoos udhaca tamarta iyo dayactirka waxyaabaha kale..

In kasta oo MPS ay iibin karto iskuulada aan la isticmaalin, tani waxay xadidi doontaa xulashooyinka koritaanka oo dhan maadaama ay jiraan xaddiyo xadidan oo dhisme oo la heli karo.

Haddii barnaamijyada dhaxalka laga joojiyo, doolarkaas waxaa loo qabsan karaa dib-u-kobcinta barnaamijyada tacliinta si kor loogu qaado waxqabadka ardayda ee aan hadda la siin.

**18) Goorma ayaan waxbadan ka maqli doonnaa daraasaddan?**

Wejiga 2aad ee daraasadda oo ay ku jirto diwaangalinta iskuulada magnetka iyo falsafada waxaa loo soo bandhigi doonaa Gudiga Golaha si looga doodo Shirka 12ka bisha Diseembar ee Shirka oo dhan. Laga bilaabo hadda illaa bisha Maarso waxaa jiri doona waqti loogu talagalay wadahadalka gudaha iyo kan dadweynaha ka hor inta aan la soo saarin talooyinka ugu dambeeya oo ay suurtagal tahay in Golaha u codeeyo bisha Abriil.

Waxii faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan soo bandhigida hore fadlan ka hel websaydhka CDD ee: https://mpls.k12.mn.us/